BARNAAMIJKA DOORASHADA

# LIBERAALERNA SKARA 2026

## Si wadajir ah ayaan u sii xoogaysaneynaa. Si cad ayaanna hore ugu soconnaa.

Skara oo ka xoog badan – kuna dhisan aqoon, isku duubni iyo is-aaminaad



Skara waa degmo leh taariikh iyo dhaqan adag, dad karti leh iyo fursado badan oo horumar.

Hase yeeshee, dad badan oo deggan degmada waxay dareemayaan in qaybo muhiim ah oo nolol maalmeedkooda ka mid ahi ay noqdeen kuwo aan sidii hore la isku hallayn karin.

- Arday aad u badan ayaa luminaya jihadooda waxbarashada.
- Maqnaanshaha dugsiga ayaa sii kordhaya.
- Shaqaalaha adeegyada bulshada waxay ku shaqeeyaan cadaadis sii kordhaya.
- Shaqooyin badan ma bixiyaan fursado horumarineed oo waqti dheer ah.
- Adeegyada caafimaadka iyo daryeelka badanaa waxaa loo arkaa kuwo kala daadsan oo ay adag tahay in la fahmo ama la maro.

Kuwani ma aha dhibaatooyin gooni-gooni ah. Dhammaantood way isku xiran yihiin.

Dugsi xooggan wuxuu dhisaa shaqaalaha iyo suuqa shaqada ee berrito. Shaqooyin ammaan ah waxay xoojiyaan qoysaska iyo xaafadaha. Daryeel waayeel oo lagu kalsoon yahay wuxuu dhisaa is-aaminaadda u dhexeysa jiilalka. Marka bulshada si wanaagsan u shaqeyso, degmadu waxay noqotaa meel ka ammaan badan, deggan oo xasilloon.

Degmo le'eg Skara, ilmo iyo qof waayeel ah midna waa inuusan dareemin in la dayacay ama aan la arkin.

Liberaalerna waxay doonayaan inay Skara ku xoojiyaan aqoon, masuuliyad, xirfadnimo iyo qorshe fog—ma aha hadallo kulul, balse mudnaan cad iyo iskaashi wanaagsan.

## 1. Waxbarashada – Dib u soo celi diiradda oo kor u qaad natiijooyinka

Waxbarashadu waa saldhigga xorriyadda, fursadaha, kalsoonida nafta iyo madaxbannaanida.

Skara waxay leedahay macallimiin karti leh iyo fasallo aan aad u buurnayn. Si kastaba ha ahaatee, arday aad u badan ayaa weli la tacaalaya joogitaanka dugsiga, feejignaanta, caadooyinka akhriska iyo natiijooyinka waxbarashada.

Arrintu ma aha kheyraad yari. Waxay ku saabsan tahay filashooyin cad, taageero hore iyo iskaashi xooggan oo ku saabsan ardayga.

**Waxaan rabnaa inaan:**

- Hirgelinno fasallo aan lagu isticmaalin taleefannada gacanta.
- Si joogto ah ula soconno maqnaanshaha dugsiga.
- Hubinno in waalidiinta ama masuuliyiinta carruurta lala xiriiro sida ugu dhaqsaha badan marka ay jirto walaac.
- Xoojinno maktabadaha dugsiyada iyo caadooyinka akhriska ee maalinlaha ah.
- Bixinno dugsi xagaaga ah iyo hawlo fasaxyada lagu qabto oo xoogga saaraya waxbarashada.

### Dugsiga iyo gurigu waa inay wada shaqeeyaan

Carruurtu waxay ugu wanaagsan yihiin marka dugsiga iyo qoysku ay si hore, cad oo joogto ah u wada shaqeeyaan.

Waxaa hore u jira xirfadlayaal leh aqoon luqadeed oo qiimo leh, faham dhaqameed iyo kalsooni ay bulshada ku dhex leeyihiin, balse awooddooda si buuxda looma adeegsan.

**Sidaas darteed waxaan rabnaa inaan:**

- Si wanaagsan ugu dhex darno macallimiinta afka hooyo hawlaha taageerada ardayda ee dugsiga.
- Hagaajinno xiriirka u dhexeeya dugsiga iyo qoysaska.
- Siinno waalidiinta hagitaan cad oo ku saabsan habraacyada iyo waxa laga filayo.
- Dhibaatooyinka ogaanno xilli hore ka hor inta aanu ardaygu dib uga dhicin waxbarashada.
- Abuurro jawi waxbarasho oo deggan oo xasilloon oo ardayga u suurtageliya inuu horumar sameeyo.

Ilmo keliya ma aha inuu si aamusan uga lumo fasalka.

## Hadafkeenna

- Natiijooyin waxbarasho oo sareeya.
- Maqnaansho dugsi oo yaraada.
- Kalsooni nafeed oo xooggan oo ardayda dhexdeeda ah.
- Taageero hore marka dhibaatooyin soo baxaan.

# 2. Shaqo iyo Isdhexgal – Laga bilaabo Shaqo ilaa Xirfad

Shaqadu waa inay horseeddaa madaxbannaani, xirfad, karti iyo fursado waara oo mustaqbalka ah.

Shaqooyin badan oo ka jira xannaanooyinka carruurta iyo daryeelka waayeelka ayaa weli loo arkaa xalal ku meel gaar ah halkii looga aqoonsan lahaa xirfado mudan ixtiraam. Isla markaana, waa shaqooyinkan kuwa qaabeeya bilowga iyo dhammaadka nolosha.

Waxay mudan yihiin maqaam sare, fursado horumarineed oo cad iyo shuruudo shaqo oo waara.

Waxaan rabnaa in xirfadaha adeegyada bulshada ay noqdaan kuwo dadku si ikhtiyaari ah u doortaan, isla markaana ay ku sii faanaan inta ay ku jiraan shaqadooda.

Annaga oo kaashanayna, tusaale ahaan, Axevalla Folkhögskola iyo hay'adaha kale ee waxbarashada, waxaan rabnaa inaan xoojinno waddooyinka u horseeda shaqo, barashada afIswiidhishka ee ku salaysan xirfadda iyo horumarinta xirfadeed.

**Waxaan taageeri doonnaa:**

- Waxbarasho dabacsan oo lagu qaato goobta shaqada.
- Barashada af-Iswiidhishka ee ku salaysan xirfadda, kuna xidhan shaqada maalinlaha ah.
- Horumarin joogto ah oo lagu kobcinayo aqoonta iyo xirfadaha.
- Barnaamijyo hagid (mentorship) iyo diyaarinta hoggaamiyeyaasha mustaqbalka.
- Tababarro takhasus leh oo la jaanqaadaya masuuliyado waaweyn.

### Jaranjaro shaqo oo cad

Horumarka shaqadu waa inuusan ku xirnaan oo keliya muddada uu qofku shaqaynayay. Kartida qofka, hindisihiisa, masuuliyad-qaadashadiisa iyo waxbarashada sii socota waa inay sidoo kale u noqdaan waddooyin uu ku gaadho horumar.

Gaar ahaan daryeelka waayeelka, shaqaale badan ayaa ka shaqeeya jawi adag, halkaas oo kooxaha shaqadu ay aad ugu kala duwanaan karaan heerka waxbarashada, waayo-aragnimada, aqoonta luqadda iyo hawlaha caafimaad ee loo igmaday.

Kooxo shaqo oo aan isku dheellitirnayn waxay culays saaraan shaqaalaha iyo tayada adeegga.

Nidaamka wareejinta masuuliyadaha caafimaad waa lagama maarmaan si loo helo dabacsanaan iyo badbaadada bukaanka. Hase yeeshee, tayo waarta waxay sidoo kale u baahan tahay isku dheelitirnaan wanaagsan oo u dhexeysa aqoonta, xirfadda iyo masuuliyadda kooxaha shaqada.

Annaga oo kaashanayna hay'adaha kale ee waxbarashada, Skara waa inay abuurtaa fursado cad oo u saamaxaya shaqaalaha inay si tartiib tartiib ah u horumariyaan aqoonta af-Iswiidhishka, shahaadooyinkooda rasmiga ah, waayo-aragnimada shaqada iyo masuuliyadahooda.

Arrintu ma aha oo keliya yaraanta shaqaalaha.

Waxay sidoo kale ku saabsan tahay dhisidda kooxo daryeel oo ammaan badan, tayo leh oo waara.

Mana aha in la abuuro nidaamyo xafiiseed oo aan loo baahnayn.

Waxay ku saabsan tahay in xirfadaha adeegyada bulshada laga dhigo kuwo soo jiidasho leh, waara, isla markaana siiya dadka fursado ay ku horumaraan mustaqbalka.

## Hadafkeenna

- Aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha oo kor u kacda.
- Faanka iyo sharafta xirfadda oo sii xoogaysata.
- Isbeddelka joogtada ah ee shaqaalaha oo yaraada.
- Fursado horumarineed oo cad oo qof walba u furan.

## 3. Adeegyada Bulshada iyo Xaaladaha Shaqada – Tayo Waarta

Adeegyo bulsho oo tayo leh waxay u baahan yihiin naxariis, ixtiraam iyo nidaam wanaagsan.

Daryeelka waayeelka ee Skara waxaa si weyn u qiimeeya dad badan oo degmada deggan. Hase yeeshee, shaqaaluhu waxay inta badan ku shaqeeyaan cadaadis weyn, iyagoo wajahaya habab shaqaale-qoris oo aan joogto ahayn iyo xasillooni yari ka jirta kooxaha shaqada.

Marka shaqaaluhu si joogto ah isu beddelaan, waxaa daciifa xiriirka ka dhexeeya shaqaalaha iyo dadka waayeelka ah ee ku tiirsan inay maalin kasta arkaan wajiyo ay yaqaannaan oo ay ku kalsoonaadaan.

Waxaan rabnaa in adeegyada bulshada ay xoogga saaraan tayo waarta, halkii ay ku tiirsanaan lahaayeen xalal degdeg ah oo ku meel gaar ah.

**Taas macnaheedu waa:**

- Shaqaale-qoris iyo qorshayn shaqaale oo deggan oo la saadaalin karo.
- Soo-dhaweyn iyo tababar wanaagsan oo la siiyo shaqaalaha cusub.
- Iskaashi xooggan oo u dhexeeya maamulka iyo shaqaalaha.
- Taageero hore si loo yareeyo fasaxyada jirrada ee muddada dheer oo laga hortegi karo.
- Jadwal shaqo oo waara, dheellitiran oo u roon shaqaalaha.

Maqnaanshaha badan ee shaqaalaha sababo la xiriira jirro iyo isbeddelka joogtada ah ee shaqaaluhu waxay keenaan kharash dhaqaale iyo mid bulsho labadaba.

Shaqaale dareemaya in la qadariyo lana taageero waxay abuuraan jawi deggan, ammaan badan oo lagu kalsoonaan karo, taas oo faa'iido u leh dadka adeegga hela iyo qoysaskoodaba.

## Hadafkeenna

- Goobo shaqo oo caafimaad iyo badbaado leh.
- Isbeddelka joogtada ah ee shaqaalaha oo yaraada.
- Daryeel ammaan badan oo lagu kalsoonaan karo, kana faa'iidaystaan dadka adeegga hela iyo shaqaaluhuba.

# 4. Caafimaadka iyo Daryeelka Caafimaadka – Kalsooni, Helitaan iyo Xiriir Bani'aadamnimo

Adeegyada caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka waxaa maamula gobolka, balse saamayntoodu si toos ah ayay uga muuqataa nolosha dadka ku nool degmada.

Maanta, dad badan oo deggan Skara waxay u arkaan adeegyada caafimaadka kuwo kala daadsan, aan shakhsiyad lahayn, isla markaana ay adag tahay in si sahlan loo isticmaalo.

Carruurta, dadka waayeelka ah iyo qoysasku waxay si gaar ah ugu baahan yihiin adeegyo si fudud loo heli karo, joogteyn leh iyo xiriiro daryeel oo ay yaqaannaan kuna kalsoonaadaan.

Skara waa inay si firfircoon uga shaqaysaa:

- Joogteyn dheeraad ah oo laga sameeyo daryeelka caafimaadka aasaasiga ah.
- Nidaamyo ballan-qabasho oo fudud, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan xalal dijitaal ah.
- Habraacyo sahlan oo u fududeeya carruurta iyo dadka waayeelka ah.
- Tijaabinta habab uu qofku ku yeesho dhakhtar joogto ah marka ay suurtagal tahay, taas oo muddo dheer ahayd himilo ay Liberaalerna taageerayeen.

Adeegyada caafimaadku waa inay noqdaan kuwo shakhsi ahaan u dhow, si fudud loo fahmi karo oo lagu kalsoonaan karo, ee aan noqon kuwo aan qofna lahayn ama kala daadsan.

## Hadafkeenna

- Adeeg caafimaad oo dadku si fudud u aqoonsan karaan, ku kalsoonaan karaan, isla markaana si ammaan ah ugu adeegsan karaan.

# 5. Bulsho Isu Timaadda

Skara waxay sii hodmaysaa luqado kala duwan, dhaqammo, muusig, cuntooyin iyo waayoaragnimo nololeed oo kala geddisan.

Kala duwanaanshahani waa awood iyo hanti bulshada u taal—laakiin wuxuu miro dhalayaa oo keliya marka dadku ay si dhab ah ugu kulmaan nolol maalmeedkooda.

Waxaan rabnaa inaan abuurno goobo badan oo ay dadka ka kala yimid asallo iyo dhaqammo kala duwan ku kulmi karaan.

## Bandhigga Xagaaga ee Dhaqamada Kala Duwan – Fornbyn

Fornbyn waxay bixisaa goob dabiici ah oo ku habboon in lagu qabto bandhig xagaaga ah oo ku salaysan:

- Muusig.
- Dhaqamada cuntada.
- Hawlo dhaqameed.
- Barnaamijyo qoysaska loogu talagalay.
- Ka qaybgalka ururrada deegaanka iyo bulshada rayidka ah.

Maaddaama kumannaan qof ay xagaaga kasta u yimaadaan Skara Sommarland, Skara waxay haysataa fursad ay ku xoojiso dalxiiska iyo isku duubnida bulshada iyadoo qabanaysa munaasabado furan oo qof walba lagu soo dhoweynayo.

Bandhiggu waa inuu booqdayaasha tusaa quruxda dhaqammo kala duwan iyada oo loo marayo muusig, dhar dhaqameed, farsamooyin gacmeed, cuntooyin iyo caadooyin nololeed—dhammaanna lagu soo bandhigayo jawi qoysasku ku raaxaysan karaan oo ku dhisan xiise, isbarasho iyo is-ixtiraam.

Muusiggu waa inuu noqdaa awoodda mideysa bandhigga, balse looma baahna fanaaniin caan ah oo qaali ah ama bandhigyo ku dhisan bilicsanaan ku meel gaar ah.

Halkii taas laga samayn lahaa, bandhiggu waa inuu fursad siiyaa dhallinyarada iyo hibada soo koraysa ee leh xididdo dhaqan oo dhab ah iyo xiriir adag oo ay la leeyihiin bulshada deegaanka.

Mudnaanta waa inay noqotaa wax maxalli ah, dhab ah oo bulshada mideeya.

**Bandhigga waa in ugu horrayn lala horumariyaa:**

- Ganacsatada iyo shirkadaha maxalliga ah ee taageera.
- Ururrada dhaqanka iyo bulshada.
- Ururrada waxbarashada dadka waaweyn iyo dugsiyada dhaqanka.
- Ganacsatada maxalliga ah ee cuntada.
- Mutadawiciinta, kooxaha dhallinyarada iyo qabanqaabiyeyaasha deegaanka.

Ujeeddadu waa in la abuuro dhaqan xagaaga soo noqnoqda oo qof walba soo dhoweeya, si fudud loo wada gaadhi karo, isla markaana dhaqaale ahaan waara.

## Toddobaadka Adeegyada Gurmadka

Kalsoonida u dhexeysa muwaadiniinta iyo hay'adaha bulshada laguma dhisi karo oo keliya xilliyada dhibaatooyinka.

Inta lagu jiro Toddobaadka Adeegyada Gurmadka, dugsiyada, ururrada dhallinyarada iyo dadka deegaanka waxay fursad u heli doonaan inay la kulmaan:

- Booliska.
- Adeegga dab-demiska iyo samatabbixinta.
- Shaqaalaha ambalaaska.
- Hay'adaha u qaabilsan maaraynta dhibaatooyinka iyo u-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah.

Ujeeddadu ma aha oo keliya in la soo bandhigo baabuurta gurmadka ama dareesyada shaqada.

Dhallinyaradu waa inay helaan fursad ay ku bartaan dadka ka dambeeya dareeska, una fahmaan masuuliyadda ay bulshada u hayaan. Isla markaana waa inay ogaadaan waxa bulshada iyagana laga filayo: ixtiraamka sharciga, qaadashada masuuliyadda shakhsiga ah, iskaashiga xilliyada dhibaatooyinka iyo ka qaybgal firfircoon oo nolosha bulshada ah.

Sidoo kale, shaqaalaha adeegyada gurmadku waa inay helaan fursad ay ku dhegaystaan waayoaragnimada, fikradaha iyo walaacyada dhallinyarada iyo bulshada deegaanka.

Kalsoonidu waxay ku kortaa is-arag joogto ah, is-aqoonsi iyo is-ixtiraam.

Toddobaad si wanaagsan loo qorsheeyey oo loogu talagalay adeegyada gurmadku wuxuu xoojin karaa kalsoonida bulshada, wanaajin karaa u-diyaargarowga xaaladaha degdegga ah, isla markaana yarayn karaa masaafadda aan loo baahnayn ee u dhexeysa hay'adaha iyo muwaadiniinta.

## Dhallinyaradu Waa Inay Dareemaan In La Qiimeeyo

Bulsho ammaan ah lama dhiso marka dhibaatooyinku hore u qarxeen. Waxaa la dhisaa waqti dheer ka hor— hareeraha miiska cuntada, fasallada dugsiga, garoomada kubbadda, qolalka muusigga, maktabadaha, goobaha farsamada iyo ururrada bulshada.

Dhallinyarada dareema inaan la arag ama aan la qiimayn, ugu dambayn way ka fogaadaan bulshada. Laakiin dhallinyarada la siiyo kalsooni, masuuliyad iyo dhiirrigelin waxay inta badan ku koraan masuuliyaddaas.

Maanta, dhallinyaro badan waxaa loo sheegaa waxa ay tahay inay ka fogaadaan, balse aad bay u yar tahay inta si cad loogu sheego inay dhab ahaantii bulshada muhiim u yihiin.

**Bulsho xooggan waa inay dhallinyaradeeda ku tiraahdaa:**

- Adigu halkan ayaad ka tirsan tahay.
- Waxaad qayb ka tahay bulshadan.
- Waxqabadkaagu qiimo ayuu leeyahay.
- Mustaqbalkaagu wuxuu si dhow ula xidhiidhaa mustaqbalka Skara.

Sidaa darteed, dugsiyada, ururrada isboortiga, hay'adaha dhaqanka, ganacsiyada, ururrada bulshada iyo degmada waa inay si dhow u wada shaqeeyaan.

**Tani waxay noqon kartaa:**

- Iskaashi xooggan oo u dhexeeya dugsiyada iyo loo-shaqeeyayaasha maxalliga ah.
- Hagid muuqata oo ay bixiyaan dadka waaweyn iyo tusaalooyinka wanaagsan ee bulshada.
- Hawlo si fudud loo heli karo oo dhinacyada isboortiga, muusigga, fanka iyo ururrada bulshada ah.
- Shaqooyin xagaaga iyo fursado shaqo oo wax ku ool ah.
- Goobo ay dhallinyarada ka qaybqaadashadooda lagaga filayo inay wax ku biiriyaan, halkii ay kaliya ka ahaan lahaayeen ka faa'iidaystayaal.
- Dhiirrigelin hore oo ku wajahan hoggaaminta, shaqada mutadawacnimada iyo wadashaqaynta kooxeed.

Isku duubnida bulshada waxay kobocdaa marka dadku dareemaan in la arkay, la ixtiraamay, isla markaana loo baahan yahay.

## Hadafkeenna

- Isku duubni bulsho oo sii xoogaysata.
- Kalsooni weyn oo u dhexaysa jiilalka iyo hay'adaha bulshada.
- Xaafado iyo goobaha dadweynaha oo ammaan badan.
- Dhallinyaro isku kalsoon oo leh himilo iyo yididiilo.
- Aqoonsi maxalli ah oo sii xoogaysta oo Skara leedahay.

Degmo waxay sii xoogaysataa marka dhallinyaradu dareemaan inay qayb ka yihiin dhismaha bulshada, ee aanay ka ahayn kuwo ka baxsan.

# 6. Ganacsiga Maxalliga ah, Miyiga Firfircoon iyo Koboc Waara

Degmo xooggan laguma dhiso oo keliya hay'adaha dawladda. Waxaa sidoo kale dhisa dadka maalin kasta wax abuura, wax hagaajiya, wax beera, wax daabula, adeegyo bixiya, horumariya fikrado cusub, isla markaana diyaar u ah inay halis qaadaan si ay u abuuraan fursado cusub.

Ganacsiyada yaryar, beeraha, dukaamada maxalliga ah, farsamayaqaannada, maqaaxiyaha, shirkadaha adeegyada iyo ganacsiyada qoysasku leeyihiin waxay laf-dhabar u yihiin bulshada Skara. Waxay abuuraan shaqooyin, taageeraan ururrada bulshada, isla markaana isku xira magaalada iyo miyiga.

Miyigu ma aha wax ka haray waayihii hore. Weli wuxuu qayb muhiim ah ka yahay aqoonsiga Skara, dhaqaalihiisa, u-diyaargarowgiisa iyo horumarkiisa waara.

Liberaalerna waxay doonayaan in Skara noqoto degmo lagu ixtiraamo ganacsiga, lagu dhiirrigeliyo hindisayaasha maxalliga ah, isla markaana miyigu u sii ahaado meel soo jiidasho leh oo jiilalka mustaqbalka ay ku noolaadaan.

### Ganacsiyada Yaryar Waa Inay Koraan

Maanta, Skara waxay ku jirtaa meel hoose marka la eego qiimeynta jawiga ganacsiga ee degmooyinka. Tani ma aha masiibo, balse sidoo kale kuma habboona degmo leh goobta, dhaqanka, kartida iyo fursadaha ay Skara leedahay.

Ganacsiyo badan oo yaryar waxay la kulmaan hubanti la'aan aan loo baahnayn, habraacyo gaabis ah iyo dhibaatooyin ku saabsan la macaamilka degmada.

Degmadu waa inay noqotaa mid si fudud loo gaadhi karo, xal-doon ah, isla markaana dhegaysata ganacsatada iyo loo-shaqeeyayaasha maxalliga ah.

Skara waa inay hiigsato inay kor u qaaddo kaalinteeda qiimeynta jawiga ganacsiga, ma aha sumcad darteed, balse sababta oo ah jawi ganacsi oo wanaagsan wuxuu abuuraa shaqooyin, xoojiyaa rajada mustaqbalka, dhiirrigeliyaa dadka inay u soo guuraan degmada, isla markaana soo jiita maalgashi waara.

**Waxaan rabnaa:**

- Xiriir degdeg ah oo cad oo u dhexeeya degmada iyo ganacsatada.
- Habraacyo degmo oo fudud, meel kasta oo ay suurtagal tahay.
- Wadahadal iyo iskaashi wanaagsan oo u dhexeeya degmada iyo ganacsatada maxalliga ah.
- Iskaashi xooggan oo u dhexeeya dugsiyada iyo suuqa shaqada.

- Fursado badan oo tababar shaqo, barnaamijyo shaqo-barasho iyo shaqooyinka xagaaga.
- Taageero weyn oo la siiyo ganacsatada da'da yar iyo hindisayaasha maxalliga ah.
- Hannaan qandaraas-bixin oo caddaalad ah, hufan oo daahfuran.
- Fursado wanaagsan oo u sahla ganacsiyada yaryar inay ka hirgalaan kuna koraan Skara.

Dhaqaale maxalli ah oo caafimaad qaba kuma tiirsana oo keliya loo-shaqeeyayaal waaweyn. Wuxuu sidoo kale ku dhisan yahay kumannaan dadaal oo maalin kasta ay sameeyaan dadka iskood u shaqeysta iyo ganacsiyada yaryar ee degmada oo dhan.

Ganacsigu ma aha oo keliya faa'iido dhaqaale. Wuxuu kaloo ku saabsan yahay masuuliyad, halabuur, dadaal iyo hirgelinta fikrado cusub.

## 7. Siyaasaddu Waa Inay Xallisaa Dhibaatooyinka

Siyaasadda degmadu waa inaysan isu beddelin tartan siyaasadeed oo joogto ah, halkaas oo tamarta lagu bixiyo sidii looga adkaan lahaa mucaaradka halkii diiradda lagu saari lahaa xallinta dhibaatooyinka dhabta ah.

Kala aragti duwanaanshuhu waa qayb dabiici ah oo ka mid ah dimuqraadiyadda. Hase yeeshee, dadka deggan degmada waxay sidoo kale filayaan in wakiilladooda la doortay ay xoogga saaraan natiijooyin muuqda, iskaashi marka ay suurtagal tahay, iyo masuuliyad fog oo waarta.

Liberaalerna ee Skara waxay rabaan inay gacan ka geystaan jawi siyaasadeed oo deggan, ixtiraam leh, isla markaana wax dhisa, halkaas oo arrimaha muhiimka ah loogu wajaho culayska iyo masuuliyadda ay mudan yihiin.

Siyaasaddu waa inay yaraato ciyaarta siyaasadeed, kana badnaato natiijooyinka ay dadku si dhab ah uga dareemaan nolol maalmeedkooda.

## 8. Dimuqraadiyad, Ka Qaybgal iyo Masuuliyad Wadajir ah

Degmo xooggan kuma dhisna oo keliya dugsiyo wanaagsan iyo xaafado ammaan ah.

Waxay sidoo kale u baahan tahay kalsooni lagu qabo dimuqraadiyadda lafteeda.

Iswiidhan gudaheeda, muwaadin kasta oo xaq u leh inuu codeeyo wuxuu xaq u leeyahay inuu si xor ah, qarsoodi ah, isla markaana aan cadaadis jirin u doorto cidda uu taageerayo.

Codkaagu waa qarsoodi. Adigaa iska leh, cid kale ma laha.

Qofna waa inuusan dareemin cadaadis kaga imanaya kooxo siyaasadeed, shabakado bulsho, hoggaamiyeyaal diimeed, kooxo dambiilayaal ah ama cid dibadda ka timid oo ku saabsan sida uu u codeynayo ama uga qaybqaadanayo nolosha bulshada.

Liberaalerna waxay aaminsan yihiin in dimuqraadiyaddu sii xoogaysato marka dad badan ay dareemaan ammaan ay kaga qaybqaadan karaan nolosha bulshada, gaar ahaan dhallinyarada, codbixiyeyaasha markii ugu horreysay codeynaya iyo dadka aan weli si buuxda ugu dhex milmin bulshada deegaanka.

Codeyntu ma aha oo keliya xuquuq.

Waa sidoo kale fursad lagu saameeyo mustaqbalka dugsiyada, adeegyada caafimaadka, amniga, shaqooyinka, daryeelka waayeelka iyo horumarka Skara.

**Waxaan rabnaa degmo ay:**

- Ka qaybgalka bulshada si firfircoon loo dhiirrigeliyo.

- Xorriyadda qofka la ixtiraamo.
- Dadka asal iyo dhaqammo kala duwan leh ay iskula kulmaan kalsooni iyo is-ixtiraam.
- Qiimaha dimuqraadiyadda si deggan, furan oo kalsooni leh loo ilaaliyo.

Bulsho xor ahi kuma dhisna sharciyo iyo hay'ado oo keliya.

Waxay sidoo kale ku dhisan tahay muwaadiniin dareemaya in codkooda la maqlo, la tixgeliyo, isla markaana uu saamayn leeyahay.

## Mabda'ayaga

Qaar kale waxay ku badan yihiin ballanqaadyo.

Annagu waxaan xoogga saarnaa natiijooyin.

Qaar kale waxay difaacaan nidaamyada sida ay maanta yihiin.

Annagu waxaan rabnaa inaan hagaajinno sida ay u shaqeeyaan.

Waxaan aaminsanahay in:

- Filashooyin cad.
- Iskaashi.
- Karti iyo masuuliyad.
- Aragti fog iyo qorshe waara. ay horseedaan natiijooyin wanaagsan, qofka iyo bulshada labadaba.

## Gunaanad

Skara kama maqna karti iyo awood ay ku horumarto.

Waxa ay u baahan tahay waa mudnaan cad, iskaashi xooggan iyo filashooyin sare, iyadoo lagu darayo kalsoonida lagu qabo awoodda dadka inay koraan, wax ku biiriyaan oo masuuliyad qaataan.

Degmo xooggan laguma dhiso kala qaybsanaan ama filashooyin la dhimay.

Waxaa loo dhisaa tallaabo tallaabo:

- Iyadoo la dhisayo dugsiyo tayo leh.
- Iyadoo la xaqiijinayo adeegyo bulsho oo lagu kalsoonaan karo.
- Iyadoo la abuurayo goobo shaqo oo dadka siiya sharaf iyo horumar.
- Iyadoo la hirgelinayo siyaasad xallisa dhibaatooyinka dhabta ah.

**Waxaan rumaysanahay:**

- Aqoon ka hor halku-dhegyo.
- Masuuliyad ka hor kala qaybsanaan.
- Aragti fog ka hor xalal ku meel gaar ah.
- Xalal wax ku ool ah ka hor riwaayad siyaasadeed.

Waa jihada aan rabno inaan Skara u horseedno.

Degmo waxay si fiican u shaqaysaa marka dadku dareemaan in dadaalkooda, masuuliyaddooda iyo rajadooda mustaqbal ay weli qiimo leeyihiin.

# U codee Liberaalerna

**Aqoonta darteed.**

**Masuuliyadda darteed.**

**Kalsoonida darteed.**

**Skara oo ka xoog badan darteed.**

## Liberaalerna Skara 2026

**Si wadajir ah ayaan u sii xoogaysaneynaa. Si cad ayaanna hore ugu soconnaa.**



Skara Liberalerna 2026